



CCS ELEVATE

COLUMBUS ALTERNATIVE HIGH SCHOOL

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadayaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad-raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guiddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.



Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guiddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyi qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.



Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha Guud waxay ku talinayaan in Guiddida Waxbarashadu xiro Xarunta McGuffey. **Dugsiga Sare ee Columbus Alternative High School (1926)** waxaa soo dhawayn doona bulshada Dugsiga Sare ee East High School.

Dugsiga Sare ee East High School(1923) wuxuu u-adeegi karaa 958 arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2023-2024, 381 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-galisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 43%.

Dugsiga CAHS, wuxuu ku yaallaa xaafadda Linden, hadda waxaa ka diiwaan-gashan 752 arday. Dhismaha hadda ku yaal Waddada McGuffey waxaa markii hore loo qaabeeyey sidii dugsi hoose. Ka soo guurista CAHS ee u-soo guurista dhismaha Dugsiga Sare ee East High School waxay siinaysaa barnaamijkan fursad uu ku koro oo ah meel la-cusboonaysiyyat taas oo sharfaysa maal-gashiyadii hore ee bulshadeena iyo ka faa'lidaynsiga wanaagsan ee dhismaha dhanka bari ee la-cusboonaysiyyat. CAHS waxay leedahay barnaamij faneed oo heer sare ah oo ka soo bixi doona masraxa sida quruxda badan loo cusboonaysiyyat ee Dugsiga East

High School. Kordhinta ardayda CAHS si fudud ayaa loo soo dejin karaa hoyga dugsiga. Wuxa jiri doona fursado lagula shaqaynayo ardayda iyo qoysaska ku hareeraysan Dugsiga Sare ee East High School si loo sahamiyo isbeddelada xuduudaha marka dib-u-dhiska xaafadu dhaco. Bariga waxaa kale oo ay si fudud ay u leedahay Baska dad-weynaha ee COTA laga bilaabo waddada East Broad ilaa downtown-ka ee fursadaha shaqo barasho (internship-ka).